

XAQA AAD U LEEDAHAY IN LAGUU SHEEGO

- ◆ Xuquuqda dhibbanaha dembiga.
- ◆ Hawsha ciqaabta iyo xaqa loo leeyahay in laga qaybqaato.
- ◆ Dulucda dembi qirasho kasta.
- ◆ Isbaddallada ka dhaca hawlaha maxkamadda marka dhibbanaha maxkamada laga wacay ama la weydiisto in uu markhaati ka furo.
- ◆ Dhammaystirka kama dambaysta ee kiiska.
- ◆ Racfaanka uu xarestay eedeysanaha, xaqa aad u leedahay in aad ka qaybqaadato doodda hadalka ama dhegaysiga, iyo xaqa aad u leedahay in lagu sheego waxa uu noqonayo go'aanka kama dambaysta.
- ◆ Wax ka baddalista xukunka edeysanaha loo soo jeediyay, ay ka mid yihiin taariiqda, waqtiga, rugta dib u eegidda iyo xaqa aad u leedahay in fikrad aad ka dhiibato.
- ◆ Siidaynta ama baxsashada dembiilaha uu kaga baxsado xabsiga ama rug lagu hayay ama loo baddalo xabsi ka ammaan dabacsan.
- ◆ Codsiga dambilaha ee ah in diwaanka dembiga laga saaro.
- ◆ Xaqa codsashada qaan-celinta.
- ◆ Xaqa lagu dalbanayo magdhawga.
- ◆ Macluumaadka la xariira halka ugu dhow ee laga helayo barnaamijka ama ilaha gargaarka.
- ◆ Codsashada madaniga ee ah in dembiilaha la dawaweeyo, natiijada codsigaas, iyo ogaysiiska la xariira dhicitaanka in laga saaro/laga siidaayo xukunka madaniga ee daaweynta.

XAQA LOO LEEYAHAY IN LAGA DIFAACO HAGARDAAMADA

- ◆ Xaqa loo leeyahay in meel nabadgelyo lagu helo inta hawlaha maxkamadda ay socdaan.
- ◆ Xaqa lagu codsanayo in inta ay socoto dacwadda aan dadwaynaha shaaca looga qaadin cinwaanka guriga iyo shaqada,

lambarka telefoonka. Xaqa lagu codsanayo in hay'adda nabadsugidda asyan dadwaynaha u sheegin shaqsiga la haysto.

- ◆ Laga difaaco aargoosi ka yimaada loo shaqeeyaha uu u geysanayo dhibbanaha iyo marqaatiyada iyo dhibbanayaasha la wacay in ay ka marag furaan dembiyo culus iyaga iyo reerahooda maxkamadda u soo xaadira si ay ula socdaan dacwadaha maxkamadda.
- ◆ Faragalinta lagu sameeyo marqaatiyada waa dambi wanna in la soo sheego.

XAQA LOO LEEYAHAY IN DACWO-SOCODSIINTA LAGA QAYBQAATO

- ◆ Xaqa loo leeyahay dacwad degdegsan.
- ◆ Xaqa loo leeyahay in macluumaadka la isu keeno go'aan u badan la weeciyo.
- ◆ Xaqa hadal ama qoraal ahaan lagu diidayo in heshiis gor-gortan laga gaaro inta ay socoto doodda qadimaadda dhegaysiga.
- ◆ Xaqa hadal ama qoraal ahaan lagu diidayo xallinta ama xukunka la soo jeediyay.
- ◆ Xaqa maxkamadda loogu sheegayo hadal ama qoraal ahaan saamaynta dembiga marka uu dhacayo dhegaysiga xukunka.
- ◆ Xaqa maxkamadda loogu shegayo inta uu socdo dhegaysiga xukunka saamaynta bulsho iyo dhaqaale uu dembiga uu geystay shaqsiyaadka iyo ganacsatada jaaliyaadda.
- ◆ Xaqa in goobjoog laga noqdo xukunka iyo soojeedinta doodda dhegaysiga.
- ◆ Xaqa lagu horkeenayo warbixin la xariirta go'aanka fulinta/siidaynta dembiilaha laga siidaynayo xuquuqda madaniga.

XAQA LAGU DALBANAYO GARGAARKA DHAQAALAHA

- ◆ Dhibbanayaasha dembiyada culus waxa ay dawladda ka codsan karaan gargaarka

dhaqaalaha (magdhawga) haddii ay dhibaato xoog leh kasoo gaartay dembiga.

- ◆ Dhibbanayaasha waxa ay maxkamadda ka codsan karaan in eedeysanuhu qaan-celin bixiyo haddii dembiga lagu helo ama dembiga uu qirto.
- ◆ Dhibbanayaasha waxa ay sarkaalka asluubta ka codsan karaan in dhegaysiga siidaynta shuruudda la muddeeyo 60 cisho kahor inta aanay dhicin muddada siidaynta shuruudda waa haddi aan qaan-celinta weli la bixin

BAHDILKA, KUFSAHADA IYO WEERARKA DHIBBANAYAASHA

- ◆ Xaqa loo leeyahay in lagu sheego in aad diido go'aanka xeerilaaliyaha ee eedda hoos loogu dhigay ama dacwadda la joojiyo oo ay la socoto macluumaadka ku saabsan in lagu siiyo amarka baadbaado ama weerarka oo kharash la'aana.
- ◆ Laga difaaco argoosiga loo shaqeeyaha uu u gaysan karo dhibbanayaasha waqti caqligala ee shaqada laga joogsanayo si ay uga qayb galaan amarka badbaadada ama lagu xakamaynayo hawlaha weerarka.
- ◆ Dhibbanayaasha bahdilka waxa ay xaq u leyihiin in heshiiska kirada guriga ay dhammeeyaan ayaga oo aan lacag bixin ama ka cabsanayn ciqaab soo gaarta.
- ◆ Dhibbanayaasha kufsiga waxa si qarsoodi ah u weydiisan karaan in eedaynaha laga baaro HIV.
- ◆ Dhibbanayaasha kufsiga lagama rabo in ay bixiyaan qarashka ku baxayo baarikaanka kufsiga.
- ◆ Dhibbanayasha kufsiga waxa dhici karta in aan la weydiin amar baaritaan graaca wadnaha iyo neefsiga ee tijaabada run sheegista (polygraph) waxa ku taxaluqa baarista ama socdsiinta eedda.

SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIYO

Sideen ku heli karaa macluumaad qaasa ee kiiska ku saabsan?

Wac hay'adda nabadsuggidda xaafaddaada, xafiiska xeerilaaliyaha, ama adeeg bixiyaha dhibbanaha si macluumaadka lagu helo.

Maxaa dhacaya haddii aan gargaar dhaqaale u baahdo?

Waxaad u qalmikartaa madghow uu Gobolka Minnesota ku sii haddii aad tahay dhibbanaha dambi dagaal iyo qasaare soo gaaray ee iskaga bixsaya lacag la xariira caafimaadka, latashiga, maydka, ama musharo laga qaday. Waxaad u qalmi kartaa qaan-celin laga qaadayo edeysanaha haddii asaga/ayda dembiga lagu helo ama ay qirato/uu qirto.

Maxaan samaynaa haddii aan helo yeeritaan ama la igu yeero marqaati-fur?

Wacitaanka maxkamadda waa amar maxkamadda in aad timtaatid. Si taxaddir leh u aqriso. Waxaa ku qoran tilmaan-bixinnada iyo cidda aad wacaysid is aad macluumaadka maxkamadda iyo goobta ku heshid. Haseyeeshe haddii ay dhacdo in jadwalka cariiri yahay ama su'aalo aad qabtid, wac cidda warqadda wacitaanka maxkamadda kuu soo dirtay. Markhaati ahaan, waxaa lagu siin doonaa ujro yar ee aad maylka iyo waqtigaada isga bixisid.

Xuquuqdaan oo dhan ma soconayaan marka eeveysanaha uu yahay qof dhallinyar?

Haa.

Sideen ku ogaan karaa marka eeveysanaha xabsiga laga siidaynayo?

Si lagu soo ogaysiiyo arrimaha ku saabsan siidaynta dembiilaha ee xabsiga, waa inaad samaysaa codsiga gaara si lagu soo wargaliyo. La xariir VINE (Wargalinta Dhibbanaha Macluumaadka Maalinkasta) iyadoo la saxiixayo qaab toosa ee ogaysiin, ama iyado lala hadlayo daryeel bixiyaha deegaankaada wixi ku saabsan macluumaad dheeraada. Qaabka VINE waxa ku jira rugaha Waaxda Asluubaha Minnesota, iyo wax kale oo badan, laakiin kuma wada dhamma. Waaxda slubaha waxay leeyihiin foom codsi ogaysiis ee dheeraada kaa soo ay tahay in la buuxiyo.

Ma ka qaybgali karaan dhagaysiyada oo idil?

Haa. Sida badan, hababka maxkamadaha dambiyada ee ku lug leh eedaysanayaasha qaangaarka waa kuwa dadweynaha u furan. Garsooraha dhagaysiga waa xiri karaa ama dad qaarkiis waa ka rebi karaa marka ay jiraan xaaladaha qaarkood. Dhibbanayaasha dacwadaha eedaysanayaasha dhallinyarada waxay ka qaybgeli karaan hawl-socodiinnada maxkamadda.

ILAHA

Marka dembiiluhu uu xiranyahay:

Codsiga lagu doonayo ogaysiiska siidaynta maxbuuska ama lagu helayo macluumaad la xariira haynta:

Minnesota Victim Information and
Notification Everyday Service (VINE)
1.877.MN4.VINE • 1.877.664.8463
www.vinelink.com

Macluumaadka ku saabsan magdhowga lacagta dacwadaha dembiyada gacan ka hadalka, wac:

Crime Victims Reparations Board
651.201.7300 • 1.888.622.8799

Hadii aad tahay dhibbane ama markhaati oo aad rumaysantahay in lagu xadgudbay xuquuqdaadi, wac:

Crime Victim Justice Unit
651.201.7310 • 1.800.247.0390 iw.m. 3

NALAGA SOO XIRIIR


Office of Justice Programs
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

limayl: dps.justiceprograms@state.mn.us
Shabakadda internetka: www.ojp.state.mn.us

651-201-7300 Telefoonka Guud
888-622-8799 Telefoonka Lacagla'aanta
651-205-4827 Khadka Dadga Maqalka Culus (TTY)
651-296-5787 Fakis

10/10

CRIME VICTIM RIGHTS - SOMALI



XAFIISKA BARNAMIJKA
CADDALADDA

WAAXDA AMMAANKA GUUD EE MINNESOTA

OFFICE OF JUSTICE PROGRAMS
MINNESOTA DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY